



Jamhuuriyada Somaliland.



Golaaha Wakiilada JSL.



## Warbixinta

**Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 17<sup>aad</sup> Golaha  
Wakiilada JSL.**

**21/01/2012-03/04/2012**

*Warbixinta Shir-gudoonka Golaha Wakiilada ee Kal-fadhigii 17<sup>aad</sup>*

## Ku: - Mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL.

### Ujeedo: - Warbixinta Shir-gudoonka ee kal-fadhigii 17<sup>aad</sup>

#### Mudanayaal

Si aad hawlaha u qorshaysan kal-fadhiga 18<sup>aad</sup> ee Golaha Wakiilada u dardar galino una gudano xilka la idin soo igmaday, waxaan halka idiinku soo gudbinayaan waxqabadkii Golaha Wakiilada ee kal-fadhigii 17<sup>aad</sup> oo dhamaystiran si aad u xasuusataan..

#### Ajandaha Kalfadhiga 17<sup>aad</sup> ee Golaha Wakiilada.

29/01/2012

1. Warbixinta Shirgudoonka, Guddida Joogtada ah iyo Gudiyadda Golaha Wakiilada
2. Xogagaal u noqoshada qiimeynta iyo talo ka soo jeedinta Xaaladda Guud ee Dalka.
3. Mashaariicda Sharci ee Golaha Horyaal.

No.	Magaca Xeerka	Marxalada aa u marayo	Cida Gacanta ku haysa
1.	Wax- ka bedel iyo Kaabis Xeerka Baanka dhexe	Akhriska 1 <sup>aad</sup>	Gole Weynaha
2.	Xeerka Nabadgelyada Wadooyinka	Draft	Gudidda Arrimaha Dibadda
3.	Xeerka Biyaha	Madaxweynaha ka soo noqday	Gole Weynaha
4.	Xeerka Fayodhowrka Hilibka	Akhriska 1aad	Gudidda Degaanka Xoolaha Kh.Dabiicigaa
5.	Xeerka Aasaaska Komishanka Maamul wanaaga iyo la dagaalanka musuq-maasuqa	Draft	Gudidda Ilaalinta iyo Daryeelka H/Qarank
6.	Xisaab-xidhka Dawladda 2008,2009,2010	Lagu celiyey Hantidhowrka Guud	Hantidhawraha Guud ee Qaranka
7.	Miisaaniyadda Qaranka	Xukumada	Xukumada
8.	Wax ka badalka iyo kaabista Xeer-hoosaadka	Draft	Gudidda Joogtada ah
9.	Xeerka Baanka Islaamka	Akhriska 2aad	Xoghaynta
10.	Xeerka ka Ganacsiga Hawlaha Banka	Akhriska 1aad	Gudidda Dhaqaalaha
11.	Xeerka Statistics law	Draft	Gudidda Arrimaha Dibadda

3. Ansixinta Masuuliyiinta Qaranka
4. Uyeedhista Masuuliyiinta Qaranka
5. Iyo Wixii kale ee soo kordha

## Kal-fadhigii 17<sup>aad</sup>

No	Kal-fadhiga	Taariikhda uu furmay	Taariikhda uu xidhmay
1.	17 <sup>aad</sup>	21/01/2011	03/04/20111

Kal-fadhigan oo Golahu qabtey hawlo badan oo qaranka muhiim u ah sida ansixinta Xeerar uu ka mid yahay Xeerkii Baanka dhexe iyo Ansixintii Miisaaniyada Qaranka 2012, isla markaana uu Golaha isbadal shirgudoon ka dhacay, Website cusub oo shaqada iyo waxqabadka Golaha laga soconayona Golaha loo sameeyay, waxaan halkan idiinku soo Gudbinaynaa dhamaan Waxqabadkii Gole weynaha, Shir-gudoonka iyo Gudiyada Golahaba oo kala ahaa sidan soo socota.

### 1. Warbixintii Shirgudoonka iyo Gudiyada kale ee Golaha

Warbixintii shirgudoonka ee waxqabadkii Golaha sanadkii 2011 iyo tii kal-fadhigii 16<sup>aad</sup> ayaa ugu horaysay warbixinadii kal-fadhigaa laga akhriyay Golaha intaa ka dibna waxaa warbixinadii gudiyadu ahayd sidan hoose:-

No	Gudidda	Cida jeedisay
1.	Warbixnta Shirgudoonka ee sanadkii 2011	C/risaaq S. Ayanle Xoghaya Guud
2.	Warbixintii Shirgudoonka ee Kal-fadhigii 16	C/risaaq S. Ayanle Xoghaya Guud
3.	Warbixinta Gudida Joogtada, iyo	Md. Maxamed Barkhad Miigane
4.	Warbxintii Mudanayaasha Gobolada	Mudanayaal
5.	Warbixintii Miisaaniyada	Md. Cali X. Maxamed Gudida Dhaqaalaha

### 2. Xeerarka Goluhu ka dooday oo Ansixiyay

No	Xeerka	Taariikhda	Halka Loo gudbiyaw
1.	Wax iyo Kaabista Xeerka ka qaybglida Shirarka caalamku qabanayo Somalia	05/02/2012	Madaxweynaha
2..	Xeerka La-dagaalanka Budhcad badeeda	02/02/2012	Golaha Guurtida
4.	Xeerka Wareejinta Maxaabiista	02/02/2012	Golaha Guuritda
5.	Xeerka Baanka Dhexe	24/03/2012	Madaxweynaha
6.	Miisaaniyada Qaranka 2012	03/04/2012	Madaxweynaha

### 3. Masuuliyiinta Goluhu Ansixiyay

No	Magaca Masuulka	Xilka uu hayo	T/ la Ansixiyay
1	Md. C/casiis Maxamed Samaale	W. Wasaarada Maaliyada	

*Warbixinta Shir-gudoonka Golaha Wakiilada ee Kal-fadhigii 17<sup>aad</sup>*

#### 4. Masuuliyiinta Qaran ee Golaha Warbixno iyo Xogwaran siiyay.

No	Masuulka	Xilka
1.	Md, Maxamed Nuur Caraale	W. Wasaarada Arrimaha Gudaha
2.	Md. Maxamed C/laahi	W. Wasaarada Arrimaha Dibadda
3.	Md. Maxamed Xaashi Cilmi	W. hore ee Wasaarada Maaliyada
4.		

#### 5. Doorashadii 2 Xubnood oo Shirgudoonka Golaha.

Ka dib markii Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland **Md. Axmed Maxamed Maxamud Siilaanyo** u magacaabey Gudoomiye ku-xigeenkii 1<sup>aad</sup> ee Golaha Wakiilada **Md. C/casiis Maxmed Samaale** in uu noqdo Wasiirka Wasaarada Maaliyada, iscasilaadiina uu Golaha u soo gudbiyayna Goluhu ka aqbalay, waxaa banaanaatey Jagadii Gudoomiye ku-xigeenka 1<sup>aad</sup> ee Golaha Wakiilada, isla markaana Gudoomiye Ku-xigeenkii 2<sup>aad</sup> ee Golaha Wakiilada **Md. Baashe Maxamed Faarax** uu Golaha u soo gudbiyay iscasilaad si uu isugu sharaxo jagada Gudoomiye ku-xigeenka 1<sup>aad</sup> ee banaanaatey, Goluhu cod kaga aqbaley Mudanaha iscasilaadii.



Waxaa waraaqo codsi musharaxnimo ah shirgudoonka u soo gudbiyay Mudanayaal tiro badan laakiin isutanaasuley ka dib waxaa isugu soo hadhay Jagada Gudoomiye ku xigeenka 1<sup>aad</sup> labada mudane ee kala **ah Md. Baashe Maxamed Faarax** iyo **Md. Ibraahim Axemed Haybe**, halka Jagada Gudoomiye Ku-xigeenka 2<sup>aad</sup> ay isugu soo hadheen labada Mudane ee **Md. Dr Cali Yuusuf** iyo **Md. Axmedyaasiin Sh. Cali Ayaanle**.

Wuxuu Golaha Wakiiladu Fadhigiisii 22aad ee kal-fadhigii 17<sup>aad</sup> oo fadhiga oo ay ka soo xaadireen 67 mudane uu cod gacan taaga u qaadey doorashada buuxinta jagooyinka shirgudoonka ee banaanaadey, waxaana Jagada Gudoomiye ku-xigeenka 1aad uu cod gacan taaga u ugu codeeyay in **Md. Baashe Maxamed Faarax** uu noqdo Gudoomiye ku-xigeenka 1<sup>aad</sup>, halka **Md. Dr Cali Yuusuf** uu ku guuleystey Cod gacantaaga inuu noqdo

*Warbixinta Shir-gudoonka Golaha Wakiilada ee Kal-fadhigii 17<sup>aad</sup>*

Gudoomiye Ku-xigeenka 2<sup>aad</sup> ee Golaha Wakiilada, Mudanyaashii la tartameyayna ay si waji furan ugu hambalyeeyen Mudanyaasha kaga guuleysatay doorashada, sidaana lagu buuxiyay Jagooyinkii shirgudoonka.

## 6. Xeerarka Guddiyadu hayaan

No	Magaca Guddiga iyo Xeerarka ay kala hayaan
1.	<b>Guddiga Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada</b>
.	<ul style="list-style-type: none"> <li>1) Xeerka Midaynta Cashuuraha</li> <li>2) Xeerka Caymiska Qaranka</li> <li>3) Xeerka Low of Establishment of Somaliland Agency</li> <li>4) Xeerka Baananka Islaamiga ah</li> </ul>
2.	<b>Guddiga Garsoorka, xuquuqal insaanka iyo Dastuurka</b>
	<ul style="list-style-type: none"> <li>1) Wax-ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Ciqaabta guud.</li> </ul>
3.	<b>Guddiga Joogtada iyo Anshaxa</b>
	<ul style="list-style-type: none"> <li>1) Xeerka Anshaxa Guud Xeerka</li> <li>2) Xeerka Habka Maamuuska Mudanyaasha</li> </ul>
4.	<b>Guddiga Arimaha Bulshada iyo Diinta</b>
	<ul style="list-style-type: none"> <li>1) Xeerka Shaqaalaha Dawladaha Hoose</li> <li>2) Xeerka Saxaafada</li> <li>3) Xeerka Clyaaraaha</li> </ul>
5.	<b>Guddiga Arimaha Gudaha, difaaca lyo nabadgalyada Guud</b>
	<ul style="list-style-type: none"> <li>1) Xeerka Caasimada</li> </ul>
6.	<b>Guddiga Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah</b>
	<ul style="list-style-type: none"> <li>1) Xeerka istaatistikiska</li> </ul>
7.	<b>Guddiga khayraadka dabiiciga ah, Xoolaha iyo Macdanta</b>
	<ul style="list-style-type: none"> <li>1. Xeerka Fayadhawka Hilibka</li> <li>2. Xeerka Macdanta iyo shidaalka</li> </ul>
8,	<b>Guddiga Ilaaalinta Hantida Qaranka iyo Musuqmasuqa</b>
	<ul style="list-style-type: none"> <li>1. Xeerka Haayadda Maamul Wanaaga</li> </ul>


## 7. Aqoon-korodhsiyada Guddiyada Golaha

- **AWEPA:** - waxay tababar Aqoon korodhsiya u qabatey shaqaalaha Labada Gole kulan aqooneedkaas oo socdey 5 maalmood, hotel ambassador intii u dhaxeysay 28/04/2012-03/05/2012 kaas oo bixiyeen laba xubnood ka tirsan shaqaalaha barlamaanka wadan Uganda.
- **AWEPA** waxay tababar aqoon korodhsyi u samaysay Guddiga Joogto ee labada Gole (Guurtida iyo Wakiilada), aqoon korodhsigan oo Guddiyada siinayay , waxa aqoon korodhsyi ka siiyay siday u shaqayso Guddiga Joogtada ah ee iyo Awooda iyo Waajibaadka Guud ee Guddigu Golaha wakiilka uga tahay.

## 8. Website Cusub oo Golaha Loo sameeyay.



Website Cusub oo lagala soconayo Shaqada iyo Waxqabadka Golaha Wakiilada ayaa la hirgaliyay intii lagu jiray Kal-fadhigan 17aad, Websitekaas oo ay Maalgalisay Hay'ada IRI, ayay Hay'adaasi markii ay sameysay ka dib si rasmiya ugu wareejisay Shirgudoonka Somaliland iminkana yahay mid rasimya u shaqaysa.



*Warbixinta Shir-gudoonka Golaha Wakiilada ee Kal-fadhigii 17<sup>aad</sup>*

Websitekan oo ka kooban qaybaha ay u qaybsamaan Websiteyada barlamaanada, waxaa fadhi uu Goluhu yeeshay loogu soo bandhigay Mudanayaasha Golaha Websitekan iyadoo Gudoomiyaha Wakiiladu sharaxaad ka bixiyay Muhiimada uu u leeyahay ogaanshaha ama baahinta waxqabadka Golahan shacabkii soo doortey inay kala socdaan isagoo ugu danbeyntii u mahad celiyay Hay'ada IRI oo iyadu Golaha ka caawisay Hirgalinta Websitekan.

## 9. Waxqabadka Guddiyada Golaha.

### Gudidda Joogtada iyo anshaxa

Guddigu iyadoo ka wakiila Fasaxyada Golaha waxay kal-fadhigii 17<sup>aad</sup>, iyagoo la kulmi jirey Masuuliyiin Qaran oo farabadan iyadoo ka duuleysa waajibaadkeeda Dastuurka iyo Xeer Hoosaadka Golaha, Muhiimadana siinaya xil-gudashada hawlahaa Qaran, laakiin iyagoo Mudanayaasha ay safaro ugu kala baxeen Gobolada wax shir ah oo yeesheen ma jirin.

### Gudidda Khayraadka Dabiiciga, Macdanta iyo Xoolaha Nool.

23/04/2012 ayaa waxaa socdaal qaatay muddo lix cisho ah waxaa Gobolka Sanaag ugu anbabaxay koox xildhibaano ah oo ay horkacayaan Guiddida Deegaanka iyo Khayraadka dabiiciga ah,kormeerkana ayaa waxaa uu daba socday kormeero ka ka horeeyey oo ay kooxo xildhibaano ahi kusoo mareen Gobolada Awdal iyo Sool kaas oo isna ujeedadiisu ahayd u kuurgalka xaalada deegaan ee k a jirta dhulkaas taas oo ay xildhibaananadu indhahooda kusoo arkayeen dhulkaas iyo xaaladiisa sidii ay ugu dabakhi lahaayeen wixii uga soo baxa xeerar ay gacanta ku hayaan kuwaas oo kala ah



Sidoo kale waxay Gudidu markii ay taariikhdu ahayd 19/04/2012 ayaa waxaa kormeer balaadhan oo mudo Shan cisho ah qaatay ku galaabixiyey gobolka Sool koox ka tirsan xildhibaananada Golaha Wakiilada JSL waxaana kormeerkani uu daba socdey mid ka horeeyey oo ku saabsanaa u kuurgal xaga deegaanka oo ay koox xildhibaano ahi kusoo mareen Gobolka Awdal,kormeerkana oo ku saabsanaa in warbixin guud laga helo Deegaankaanka wadatashina lala sameeyo dadyowga ku nool deegaanka Gobolka Sool waxaana kormeerkana ugu muhiimsanaa u kuurgalka xaalufinta lagu hayo Dhirta iyo duur-joogta.

Ujeedada kormeerkaa ayaa waxaa ay salka ku haysaa curinta ay Guddida Deegaanka iyo khayraadka dabiiciga ah ee Golaha Wakiiladu curinayso ama ay gacanta ku hayso sadex xeer oo kala ah.

### **Guddida Cadaalda, Garsoorka iyo Xuquuqal insaanka.**



***Guddida Garsoorka, Cadaalada, Dastuurka iyo Xuquuqal Insaanka ee Golaha Wakiilada JSL*** oo safar shaqo ugu baxay labada gobol ee Sool iyo Sanaag, safarkoodan shaqo waxay ugu kuurgalayaan baahida garsoor ee taala labadan gobol iyo Xukunada cadliga ah ee ay helaan maxaabiista ku xidhan xabsiyaddan gobolada iyo Guud ahaan nidaamka garsoor ee yaala labadan gobol.

Guddidu waxay shalay soo mireen magaalada caynaba waxaanay ka bilaabeen shaqadoodii ugu horeysay waxaana ugu horeyn soo dhaweeeyey madaxda Gobolka Saraar ka dib waxay bilaabeen hawshoodii shaqo, Guddidu markaa waxa ay kormeer ku sameeyeen Guud ahaan baahiyaha iyo xaqiiqda dhabta ah ee ka jirta Gobolkaa Saraar.

Guddidu waxay u balanqaadeen dadweynaha in ay ka samayn doonaan wixii an indhahooda ku soo arkeen qoraal dheer kaasi oo ay ka hor akhriyi doonaan Baarlamaanka una gudbin doonaan madaxweynaha JSL iyo hay'addaha kale ee arrintani khusayso si wax looga qabto sida wasaarada cadaalada iyo ciidamada asluubta.

Guddidu waxay u sii dhaafeen magaalada Ceerigabo waxaanay isla saaka oo ay bishu ahayd 29 april iyana ka bilaabeen hawl tan oo kale ah guud ahaan gobolka Sanaag gaar ahaanan magaalada ceerigabo, waxayna booqdeen xabsiga dhexe ee Ceerigabo waxaa kale oo ay booqdeen maxkamada Ceerigabo iyo saldhiga booliska. waxay dhamaatood way diiyeen su'aalo la xidhaadha baahiyaha haysta goobahan ay ka shaqo qalaan , iyadoo Guddigu waydiinayay meelaha ay booqanayeen su'aalo taas oo ay ugu kuurgalayeen inay wax badan ka goodaan baahida garsoor iyo inay jiraan maxaabiis mudo dhaaf ah si loo hagaajiyo caddaalada muwaadin kastaana u helo xaq uu leeyahay.

## 10. Safaradii Dibada ee Golaha Wakiilada

- **Safarkii Gudoomiya iyo Gudoomiye Ku-xigeenka 2<sup>aad</sup>:-** Namiibiya waxa safar shaqo ku tagay Gudoomiyaha Golaha Wakiilada **Md. C/raxman Maxamed C/lahi** iyo Gudoomiye Ku Xigeenka 2aad **Md. Dr. Cali Yuusuf** 22 - 27 april 2012, waxay halkaa u tageen martiqaad ay ka heleen Gudoomiyaha Golaha Wakiilada Namiibiya (Speaker of the National Assembly) **Hon. Dr. Theo-Ben Gurireb** Mudadii ay joogeen si maamuus heer sare ah ayaa la noogu soo dheweeyay.



Namiibiya waa dal weyn oo **824,000 km<sup>2</sup>** hase ahaatee aad u dad yar, tira koobkii la sameeyay waxay noqdeen 2.1 Milyan oo qof badweynta Atlantic waxay ku leeyihiiin xeeb dheer oo gaadheysa oo gaadheysa 1600km<sup>2</sup> dalkoodu waxa uu dhaqaalaha ugu badan ka helaa macdanaha Diamond, Uranium dahabka iyo Macdano kale oo badan oo ay dhoofiyaan, waxa kale oo ay dhoofiyaan hilibka lo'da iyo kaluulka, waxay dhaqaale weyn ka helaan sidoo kale dalxiiska.



Miisaaniyadoo waxay ahayd sanadkan 2012 **\$4.5 bilyan oo dollar**, Miisaaniyada Baarlamaankooduna waa **\$115 bilyan oo dollar** caasimada Namiibiya waa **Winhock** waa magaalo yar oo 400,000 oo qof ay ku noolyihii waxana lagu tilmaamaa Magaalada Afrika ugu nadiifsan, Mudadii aan joognay waxaan la kulnay madax badan oo ay ka mid yihiin Gudoomiyaha Golaha Wakiilada **Hon. Dr. Theo-Ben Gurireb**, Gudoomiye Ku-xigeenka **Hon. Loide** oo gabadh ah **Hon. Prof Peter SWAPO** party chief Whip iyo Xildhibaano kale.

Dhinaca Xukuumada waxaanu shirar la qaateen Gudoomiyaha Gobolka Caasimadu ku taallo Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Arrimaha Dibada iyo Preme Ministerka Namiibiya, baarlamaanka namiibia waxa uu ka kooban yahay laba aqal oo kala ah Golaha Wakiilada (**National Assembly**) oo **72 Mudane** ah oo la soo doortey iyo Golaha Guurtida (**National Counsel**) oo 13 gobol min 2 Mudane laga soo doorto (**26 mudane**).



Kulankii ay la yeesheen Gudoomiyaha Golaha Wakiilada oo ah nin aad looga ixtiraamo dalkooda waxa wadankooda Wakiil uga ahaa UNka intii aanay Xornimada ka qaadan South Africa, markii dambana waxa uu noqdey Prime Minister of Namiibia wakhti dheer ayuu shirkaasi socday arrimaha Somaliland iyo Namiibia ayayna aad uga sheekaysteen wakhtigii ay guumeysga south afrika ku jireen ayuu ururka **SWAPO** Safiirkha UN u fadhiiyay ahaa waxa uu noo sheegay wakhtigaa in **Cabdiraxiim Cabdi Faarax** oo ahaa **Assistant Secretary General** uu kaalmo badan ka heli jiray Macalinkiisa Siyaasadana uu ahaa.



Prime Ministerka Namiibia Kulan nusa saace qaatey ayay la galeen waana nin aad u furfuran xiligii ay Gobanimada doodnka ahaayeen Muqdisho Laba goor ayuu yimi wuxuu yidhi wali waxaan xasuustaa Siyaad Barre oo Khudbadaynaya oo intuu ul yar lulo Jaalayaal leh , waxana uu waydiiyay waa maxay Jaalleyaal? Waxa in yna u sheegeen Labada Gudomiye barigaa Hanti wadaaga ayanu ahayn oo waa Jaale tahay (comrade).



Wuxuu u sheegay in markii Somalia Macaluushu ka dhacdey inay ku caawiyeen \$500,000 iyaguna waxay u sheegnay in somaliland oo dhaqaaleheedu hooseeyo \$750,000 ku caawiyeen, Markii wada hadaladii rasmiga ahaa noo dhamaadeen waxay ku marti qaadeen Beero badan oo ay duur joogta ku xanaaneeyaan, dal xiisayaal badani u daawasho tagaan. Ilaa dayuuradda ay ka soo fuulayeen xildhibaano iy madax kale ayaa la socday.

➤ **Safarkii Shaqaalaha ee Itoobiya.**

Shaqaale uu Gudoominayay Xoghaya Guud ee Golaha Wakiilada **Mr. C/risaaq Siciid Ayaanle**, ayaa safar tababar ku tagay 16-22/05/2012 safarkan oo ay Xoghayaha ku wahelinayeen, Agaasimaha Waaxda Hadal Qoraalka **Mr. Cawad Cali Maxamed**, Agaasimaha Qorsheynta **Mr. C/nasir Cisman Maxamud**, Agaasimaha Protocolka Mr. **Yuusuf Maxamed Aadan** iyo Labada Xoghaymood ee Gudiyada arrimaha Bulshada iyo Garsoorka iyo Cadaalada Mr. **Axmed Maxamed Cige** iyo Mr. **C/laahi Cabdi Aadan** waxay ku soo qaateen barlaamaanka Federalka Itoobiya tababar sida uu u shaqeeyo barlamaankaasi iyo waxyaabo waayo aragnimo iyo khibrad ay ka korodhsadeen, iyagoo la sheergareeyay shaqaalaha barlaamnkaasi siday labada barlamaan u shaqeeyaan.



Iyadoo si heersare ah loogu soo dhoweeyay ayna casuumad u sameeyeen barlamaanka itoobiya, sidoo kale kulamo la yeeshen Xubno ka tirsan Barlaamankaasi oo ka soo jeeda deegaanka somalida itoobiya oo casuumad u sameeyay, sidoo kale waxay kulamo la yeeshen Qusulka u fadhiya Somaliland dalkaas itoobiya Aadan Nuux Duule oo xog ka siiyay Jaaliyada Somaliland ee Adisababa, ugu danbeyntii Waxay kulan Xogwaran ah la yeeshen Gudidda Ardeyda Jaamacada ka dhigata wadankaas iyagoo ka cabanayay waxyaabo badan oo ay ugu weyntayah Deganaashihii wadanka (residence) iyo iyadoo Jaaliyada Wadankan ku sugar aanay isku xidhnayn dadka yimaadana ay Caqabado badan kala kulmaan siiba kuwa caafimaadka u yimaada oo qaali laga dhigo kharashaadka baadhista iyo dawooyinka.



**Safarkii Gudoomiyaha:-** Guddoomiyaha baarlamaanka Somaliland **Md. Abdiraxmaan Maxamed Abdillaahi (Abdiraxmaan Cirro)** Wasiirkii hore ee arrimaha dibadda **Marwo Adna Aadan Ismaciil** iyo **Xildhibaan Abdiqaadir Xaji Ismaciil Jirde** oo ka mid ah Golaha Wakiilada Somaliland ayaa ka qaybgalay shir ka dhacay Wadanka Belgium Caasimadiisa Brussels' Sidoo kale waxaa shirkan ka soo qayab galay xubno miisaan leh oo ka socday Baarlamaanka Yurub Goobta shirku ka dhacay ayaa ahayd xarunta baarlamaanka, yadoo lagu sharxay calanka Jamhuuriyadda Somaliland gudaha xarunta baarlamaanka arrintaas oo sawir quruxbadan lahayd.

Shirkan oo u dhacaayay qaab saddex gesood ah waxaa qaybta hore ee shirka lagaga doodaayay kor u kaca iyo kobaca dhaqaalaha Geeska Afrika oo ay Jamhuuriyadda Somaliland ku taalo, waxaana halkaas khusbado ka jeediyay Guddoomiyaha baarlamaanka Somaliland **Mudane Abdiraxmaan Cirro** oo sharxay dhaqaalaha Somaliland iyo dibudhiska ay ku talaabsatay, isagoo ka shekeeyay sida wax kasta hoosta looga soo bilaabay, waxaa yaguna qaybta dhaqaalaha ka hadlay Marwo **Adna Aadan** iyo Xildhibaanka **Mudane Abdiqaadir X. Ismaciil Jirde**



Guddoomiye ku-xigeenka shirkada Dahabshiil Maxamed Siciid oo isna madasha ka jeediyay khudbad dheer ayaa ka waramay doorka dhaqaale ee shirkada Dahabshiil.co ku leedahay Geeska afrika, wuxuu si mugleh uga waramay marxaladihii ay soo martay sherkadaasi isagoo sheegay inuu lasoo shaqaynaay abihii oo aasaasay sherkada ilaa markuu ahaa 8 sanno jirka. Waxaa yaguna ka hadlay oo khudbado tariikhiya ka jeediyay madasha xubnihii ka socday baarlamaanka Yurub, ku wasoo si cilmiyaysan u soo dhigay dooda dhaqaalah Geeska Afrika iyo doorka ay Somaliland ku leedahay, waxayna dhammaantod hoosta ka xariqeen inay Somaliland door muhiimada oo istaraatiji ah ugu fadhidoo dhaqaalah Geeska, isla markaana abuurtay                                  degenaasho                                  iyo    nadaam    dawladeed.

Qaybtii labaad ee shirka ayaa ahayd mid lagu daahfuraayay shirweynaha ururka SSE oo ah miday ku bahoobeen qurbajooga Yurub, isla markaana sannadkiiba mar laqabto, waxaana shirka furay Guddoomiyaha ururka SSE Abdiraxmaan Abdillaahi (Abdiraxmaan Awliyo) isagoo sharxay u jeedada shirkooda iyo wixii u qabsoomay, waxay Somaliland uga baahantahay qurbajooga iyo doorka ay ka ciyaari karaan. Sidoo kale waxaa madashaas ka hadlay Guddoomiye kuxigeenka ururkaas Marwo Fathiya oo ka timi dalka Norway, xubno ka socday ururka West London Somaliland Community, Maxamed Cumar Maygaag oo isna ka socday jaaliyadaha    Uk    iyo    xubno    kale.

Wajigii ugu danbeeyay ee shirka ayaa ahaa mid heekiisu sareeyo, kaas oo lagaga doodaayay tariikhda Somaliland, wixii u soo qabsoomay bur-burkii midowga iyo khasaarihii ka dhashay, Wuxaan ugu horeyn shirkan Saddexaad furay Guddoomiyaha baarlamaanka Somaliland **Md. Abdiraxmaan Cirro**, waxaana khudbada lagu soo dhaweyay **Marwo Adna Aadan** oo iyadu tariikhda Somaliland si weyn u sharaxday, isla markaana dhammaan dadkii madasha fadhiyay qiiro galisay. Waxaa isna hadalka qaataay mar saddexaad **Abdiqadir X. Ismacil Jirde**, halka uu hadalka ku soo noqday Abdiraxmaan Cirro oo markale khudbad dheer oo tariikhda Somaliland ah jeediyay, waxaa yaguna khudbado taas lamid ah soo jeediyay xubnihii ka socday midowga Yurub oo sharxay waxaa Somaliland u qabsoomay iyo waxaa ka dhiman

Si kastaba ha ahaate shirkan ayaa ahoo mid kamid ah shirkii ugu heerka sareeyay ee arrimaha

Somaliland lagu qadaadhigo, Sidoo kale wuxuu Gudoomiyuhu intuu uu safarkan yurub ku maqnaa la Kulan la la kulmay Wasaarada Arrimaha Dibada ee dalka Finland isagoo wasaaradaas ay ka wada hadleen Xidhiidhka labada dal.

## 11. Wufuuda Golaha Yimi.



Wafti ay hogaaminayso **Md. Ifraax Cali Kirix** oo ka tirsan Golaha deegaanka ee Magaalo kamida dalka Sweden ayaa maanta la kulmay Guddida Arrimaha Dibada Golaha wakiilada iyadoo ay waheliyaan laba journaliste [Anna Ryterhabrant](#) iyo [Alexadra Sredberg](#), ugu horeyn waxaa kulankaa ka hadlay Md. Naasir X. Cali shire oo soo dhaweyay waftiga isla markaana warbixin kooban ka siiyay dalka gaar ahaan Golaha wakiilada sheegayna muhiimada in ay aad ugu faraxsanyihiin in Md. Ifraax oo u dhalatay dalka Somaliland asal aahaan ay soo booqato dalkeeda, sidoo kale waxaa halkaa hadalo ka jeediyay Md. Saleban Yusuf Cali Koore, Md, C/kariim Aw Cali shabeel iyo Md. Baar Siciiid faarax oo ka tirsan Golaha Wakiilada iyagoo xusey in Md. Ifraax booqashadeedu wax weyn u tarayso xidhiidhka laba dal ee Sweden iyo Somaliland.

**Sidoo kale**, waxaa booqasho ku yimi Dalka intii lagu jiray Kal-fadhiga 17aad Wafti ka socda Barlamaanka Dalka aynu jaarka nahay ee Djabuti, waftigaas oo ka koobanaa shan (5) oo Mudane dumar ahaa ayna Hogaaminaysay **Md. Caasha** waxaa si weyn loogu soo dhoweyay dalka iyadoo Goluhu hormood ka ahaa soodhweyntaas, waxaana ay shir la yeeshen Shirkudoonka, isla markaa waxay Gudoomiyaha Waftigaa hogaaminayay fadhi Golaha oo lagu qaabiley ka jeedisay hadal iyadoo aad ugu mahadnaqdey Golaha Wakiilada iyo dadweynaha Somaliland ee sida fiican u soo dhoweyay waxayna xustey in booqashadooda ay ahayd mid ay dalkoodii 2aad yimadeen waxayna ka hadashay doorka Haweenka ee ka qaadashada talada iyo in loo baahan yahay in Mudanayaal badan oo dumar ay ka mid noqdaan Golahayaasha la soo dooranayo.



**Waxaa kaloo** Golaha Yimi Wafti ka socday dalka Holland waftigaas oo Shirgudoonku soo dhoweyay isla markaana kulan balaadhan oo dhinacyo badan taabanaya la yeeshay, Wefti ka Socda Holland oo uu horkacayo **Ambassador: Joost Reintfest**, kulankaasi oo ka dhacay xafiiska Guddoomiyaha Golaha Wakiilada.



Kulankan oo ahaa xogwaraysi ku saabsan xaalada dalka gaar ahaan baarlamaanka iyo hawlihiisa waxaa warbixin balaadhan weftiga ka siiyey Guddoomiye ku xigeen 1<sup>aad</sup> ee Golaha Wakiilada **Md. Baashe Maxamed Faarax iyo** Gudoomiye Ku-xigeenka 2<sup>aad</sup> **Md. Cali Yuusuf**.

Waxaa ay Gudoomiyayaashu uga war-bixiyeen weftiga miisaaniyada u gaarka ah Golaha Wakiilada iyo sida uu hawlihiisa ugu maareeyo, xilgii Golahan hada jooga la doortay oo ahayd 2005 tii , waxaa kale oo tilmaameen in dalka Somaliland sanadkasta uu galo doorosho tusaale ahaan in 2013 ay ku began tahay doorashada baarlamaanku halka 2015 kana ay began tahay doorashada madaxtooyadu sanadkanka la sugay Doorashadii Golayaasha Deegaanka.

Waxaa kale oo mudanayaashu weftiga u cadeeyeen in carqabado badan oo haystaa Somaliland ay jiraan taas oo ay ugu weyntahay ictiraaf la'aan aanay Somaliland weli beesha caalamka ka helin aqoonsi caalamiya kaas oo wax badan kala maqan.

Dhinaca kale waxaa ay Gudoomiyayaashu ay mahad naq balaadhan usoo jeediyeen Hay'ada **AWEBA** oo iyada la shaqaysa baarlamaanada aduunka taas oo wax badan ka qabatay Golayaasha qaranka Somaliland , sida uu tilmaamay Md.baashe waxaa uu sheegay in baarlamaanku uu ku shaqayn jirey qalab gabobey wixii 2005 tii ka horeeyey laakiin hada ay isticmaalaan qalabkii ugu danbeeyey kaas oo ay Hay'ada AWEBA ka caawisay baarlamaanka, waxaa kale oo waxyaabo badan ka qabatay kor u qaadida aqoonta shaqaalaha iyadoo tababaro u fidisay.

**Mr.joost** ayaa waxaa uu sheegay in uu 1986 Somaliland yimid xiligaas oo uu booqday meelo badan oo Somaliland kamida ah sida Saylac iyo Berbera uuna faraq weyni u dhexeeyo xiligaas iyo hada oo uu timaamay in Somaliland ay ku talaabsatay haruumar balaadhan. Gudoomiyayaashu waxaa ay isbarbar dhig kuseemeeyeen baarlamaanka Somaliland iyo ka Nammibiya oo ay dhowaan booqasho shaqo ku tageen kaas oo ay tilmaameen in faraq weyni u dhexeeyo tusaale ahaan miisaaniyada baarlamaanka Namibiya ayaa waxaa ay noqonaysaa boqol iyo konton million taas oo aad uga badan miisaaniyada Qaranka Somaliland.

Ugu danbayntii waxaa ay weftiga kusoo wareegeen labada hole ee baarlamaanka guurtida iyo Wakiilada kuwaas oo ay dhismihiisa hirgelisay Hay'ada AWEBA iyada oo uu hada dhamaad ku dhowyahay hole Golaha guurtida oo iyada oo isaga dhowaan labilaabay. Magacyada weftiga **Ambassador: Joost Reintjes Hans Fabeia from ministry of foreign affairs**

---

**C/risaaq Siciid Ayaanle  
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL.**

---